

Safarka iyo tallaallada isku dhafan

Tallaalku waa habka looga gudbayo safmarka, cirbadda labaad ayaana difaac fiican looga helaa in cudurka aad loogu xanuunsado iyo in la sii gudbiyo. Norway waxay sii wadaysaa in dadka laysugu dhafo labada tallaal ee mRNA, si dadka ugu badan tallaal buuxa u helaan sida ugu dhakhsaha badan.

– In kasta oo ay weli jiraan dalal aan dadka tallaalo kala duwan ka qaatay cirbadda 1-aad iyo midda 2-aad, u arkin in ay tallaal buuxa qaateen ayaa waxaa haddana muhiim ah in dadka ugu badan ee suurtaggalka ah aqbalaan qaadashada cirbadda 2-aad nooc kasta oo tallaal ah oo loo fidiyaba. Marka aad cirbadda labaad qaadato ayaa si fiican uga difaacan tahay in aad cudurka aad ugu xanuunsato iyo in aad dadka kale u sii gudbiso labadaba. Ma hayno xog sheegaysa dad norwiiijiga ah oo safar u baxay oo dhibaato kala kulmay tallaal kala duwan oo ay qaateen awgiis, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

[Qiimaynta Machadka Caafimaadka Dadweynahu](#) waxay sheegaysaa in tallaalka isku dhafan iyo kuwa isku midka ah in ay isku si wax u difaacaan, oo aysan kuwa isku dhafan keenayn waxyeello danbe oo ka halis badan midda kuwa isku midka ah. Ugu yaraan 15 dal oo ka mid ah dalalka Midowga Yurub (EU) ayaa dadka ku duray tallaal isku dhafan. EU waxay ku talisaa in dadka qaatay tallaal isku dhafan, ka dib markii ay waddamadoodu taas u doorteen istaraatiijadda tallaalkooda, in loo aqoonsado in ay qaateen tallaal buuxa. Dalka Kanada ayaa isaguna dad badan isugu dhafay tallaallo la mid ah kuwa ay Norway dadka isugu dhaftay.

Habka caadiga ah dalalka EU/EØS dhexdooda ah ayaa ah in shahaadada tallaalku qofka ka dhigayso mid tallaal buuxa qaba oo geli kara dal kale oo EU ka tirsan laba toddobaad ka dib marka uu qaato cirbadda labaad ee tallaalka. Cirbadda danbe oo keliya ayaa ka muuqanaysa shahaadada koroona.

Jarmalka ayaa dhowaan xeerarkiisa wax ka beddelay oo hadda aqbala dadka safarka ah ee ku tallaalan Pfizer iyo Moderna la isku dhafay in ay yihiin kuwo tallaal buuxa qaatay.

Ingiriiska iyo Maraykanku weli waxay doonayaan in qofku qaatay tallaal isku mid ah si loogu aqoonsado in uu qaatay tallaal buuxa. Ingiriisku cagaar ayuu Norway ka dhigay, oo karantiil ma geliyo dadka halkaas ka soo safra ayada oo aan loo eegayn in ay tallaalan yihiin iyo in kale.

– Wadahadal arrintaan ku saabsan ayaan kula jirnaa EU iyo Ingiriiska. Joojinna mayno in aan dadka ku tallaalno Pfizer iyo Moderna isku dhafan, ayuu yiri Høie.

Ilaa iyo hadda muwaaddiniinta norwiiijiga looma oggola in ay safar caadi ah ku tagaan Maraykanka. Dal kasta xor ayuu u yahay in uu soo rogo tillaabooyin iyo xayiraad looga hortagayo sii faafidda cudurka. Inta badan dalalku way ku kala duwan yihiin xeerarka gelitaanka dalka waxaanay isu beddeli karaan si degdeg ah taas oo ay keentay faafidda cudurka oo ah mid aan la sii saadaalin karin. Sidaas darteed qof kasta oo safraya asaga ayaa looga baahan yahay in uu si fiican ugu kuurgalo xeerarka ka jira dalka uu qorshaynayo in uu u safro.

Wasaaradda Arrimaha Dibeddu waxay ku talisaa in aan loo bixin safarrada aan aadka lagama maarmaanka u ahayn oo dhan, marka laga reebo kuwa lagu tegayo dalalka EU/EØS, Iswiisarland, Ingiriiska iyo dalalka ku jira liiska dalalka saddexaad ee EU kuwaas oo uu Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) u arko in ay ammaan yihiin. [Waa dalalka leh midabka basaliga ah.](#)

[Karantiilka soo gelidda iyo xeerarka imaashaha Norway - FHI](#)

Talooyinka safarka [dhowaan ayaa wax laga beddelay](#) waxayna soconayaan ilaa iyo 1-da oktoober.